



## Rasuulka Ilaahay scw wuxuu lacnaday laaluush bixiyaha iyo laaluush qaataha waana siman yihiin xaga xukunka

Abii Hureyra -Allaha ka raali ahaade wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay scw wuxuu lacnaday laaluush bixiyaha iyo laaluush qaataha waana siman yihiin xaga xukunka.

[Xadiis Saxiix ah] [Waxaa wariyay At-tirmidi iyo Axmed]

Nabigu scw wuxuu ku habaaray in Ilaahay naxariistiisa ka dheereeyo kan laaluushka bixiya, kan qaata, iyo kan u kala qaada. Ariinkaa waxaa la mid ah waxa lasiiyo gar-soorayaasha si'ay cadaalada uga leexdaan xukunka ay faraha ku hayaan, taasoo kan dhiibaya laaluushku uu ku helayo muraadkiisa si aan xaq ahayn.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/64689>

النجاة الخيرية  
ALNAJAT CHARITY

